



**KU SOO DHAWOOW**  
**KINDERGARTEN-KA**  
**HAGAHA WAALIDKA**



# Isku Diyaari Kindergarten-ka

## KU SOO DHAWOOW KINDERGARTEN-KA!

Dugsiyada Dadweynaha Metro Nashville (MNPS) waxay leeyihiin mid ka mid ah barnaamijayda barbaarinta ugu wanaagsan qaranka. Fasaladeena barbaarinta waxa ka buuxa fursado waxbarasho oo hodan ah kuwaas oo balaarin doona aragtida ilmahaaga una diyaarin doona fasalka koowaad. Waxaan idinla wadaagaynaa adiga iyo ilmahaaga xiisaha talaabada weyn ee safarka waxbarasho ee nolosha oo dhan.

Xanaanadu waxay ilmahaaga u tahay waqti xiiso leh. Hagahan ayaa ku siin doona dulmar ku saabsan barnaamijka barbaarinta, iyo macluumaadka muhiimka ah ee ku saabsan korriinka iyo waxbarashada ubadkaaga marka uu ilmahaaga bilaabayo sannadihiisa waxbarasho. Xusuusnow, daneyntaada iyo ku lug lahaanshahaaga waxbarashada ubadkaaga waxay ku beeri doontaa dabeecad wanaagsan oo xagga waxbarashada ah waxayna kor u qaadi doontaa guusha waxbarashada.

Haddii aad wax su'aalo ka qabto MNPS ama barnaamijkeena barbaarinta, fadlan la xiriir dugsiya ilmahaaga ama boggeena internetka oo ah [earlylearning.mnps.org](http://earlylearning.mnps.org).



# Barnaamijka Xanaanada

Xanaanadu waa qeyb muhiim ah oo ka mid ah barnaamijka waxbarashada Pre-K-12. MNPS waxay 5- sano jirka siisaa fasalada barbaarinta oo maalintoo dhan ah. Cilmi baaristu waxay muujinaysaa in caruurta yihiin kuwo guulo sare gaadha marka xubnaha qoysku ay door firfircoon ka qaataan waxbarashadooda. Macllinka ilmahaaga ayaa qoyskaaga siin doono fursado ay sannadka oo dhan uga qeybgalaan fasalka.

Fasalada Xanaanada ee MNPS waxay hirgeliyaan Halbeegyada Gobolka Tennessee. Si aad wax badan uga ogaato heerarka iyo manhajka lagu barto barbaarinta, fadlan booqo Manhajka iyo Tilmaamaha (Baro hoosteeda) ee [www.mnps.org](http://www.mnps.org). Fadlan akhri macluumaadkan, waayo wuxuu kaa caawin doonaa inaad fahamto waxa la baray iyo sababta.

Waxbarashada xanaanada iyo nashaadyada waa mid ku habboon da'da waxaana loo qaabeeyay si ay u gaaraan heerarka korriinka gaarka ah ee carruurta. Macallimiinteena iyo shaqaalaha dugsiga waxay ka qeybqaataan horumarinta xirfadeed ee ku salaysan cilmi baarista iyo manhajkeena, oo ay weheliso waayo argnimada togan ee fasalka, ayaa loo qorsheeyay si loogu oggolaado carruurta inay horumariyaan fahamka dunidooda. Barnaamijku wuxuu isku daraa waxbaridda:

Ardayda xanaanada waxay la kulmaan manhaj ku salaysan wax akhris-qoraal kaas oo lagu kabay habab kale duwan oo dareemayaal badan wax lagu barto dhicanyada akhriska, qoraalka iyo ereygaba. Khibradaha farshaxanka, muusiga iyo jimicsiga ayaa sidoo kale la bixiyaa.

Qimmeynta baahiyaha carruurta ayaa loo maraa indho-indhayn maalinle ah, iyo sidoo kale qiimeyn rasmi iyo mid aan rasmi ahayn, ayaa socota oo waxay u adeegtaa aasaaska waxbaridda xanaanada. Macluumaadkani wuxuu kaloo caawiyaa in macllinka fasalka uu qorsheeyo casharrada. Macallinka ilmahaaga ayaa guriga u soo diri doona warbixinno joogto ah oo ku saabsan sida ilmahaagu ku yahay dugsiga. Waxaad dugsiga ka heli doontaa ogeysiis sheegaya maalinta sannadka dhexdiisa ee loo qoondeeyay shirarka waalidka iyo macalimiinta. Macallimiintu waxay sidoo kale ay ballan shakhsiyadeed kula kulmayaan waalidiinta waqtiyada kale ee loo baahdo. Haddii aad qabto su'aalo dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijka barbaarinta, fadlan kala xiriir Xarunta Macluumaadka Qoyska 615-259-INF0(4636) ama [familyinfo@mnps.org](mailto:familyinfo@mnps.org).



**FANKA AFKA**



**XISAABTA**



**SAYNISKA**



**CAAFIMAADKA**



**BADBAADADA**



**XIRFADAHA  
BARASHADA  
BULSHADA**



# Xog Muhiim ah

---

## 1 SAACADAHA DUGSIGA

Waqtiyada furitaanka iyo xiritaanka dugsiga ilmahaaga waxaad ka heli kartaa website-ka dugsiga. (Booqo [www.mnps.org](http://www.mnps.org) si aad u hesho website-ka dugsiga.) Sida marka ugu horeysa ee barbaarinta, maqnaanshaha badan wuxuu keeni karaa in carruurta dib uga dhacaan dugsiga. Waa muhiim inaad ilmahaaga u dejiso dhaqanka wanaagsan ee imaanshaha, oo ay ku jiraan waqti ku imaanshaha iyo ku bixitaanka maalin kasta, iyo yarenta maqnaanshaha. Macluumaadka ku saabsan jadwalka fasalka ilmahaaga, fadlan kala xiriir dugsiga ilmahaada.

## 2 QURAAC/QADO

Xafiiska Adeegyada Nafaqadu wuxuu maalin dugsiiyeed kasta bixiyaa cunto caafimaad leh, nafaqo leh oo quraac iyo qado ah. Macluumaadka ku saabsan nafaqeynta waxa uu ku jiraa Buug gacmeedka Dugsiga ee Waalidka/Ardayga ee la qeybiyay bilawga sannad dugsiiyeedka ama website-ka MNPS ee [www.mnpsnutritionservices.org](http://www.mnpsnutritionservices.org).

## 3 DAAWADA/BAAHIYAA DARYEEL EE GAARKA AH

Maamulida Rijeetada daawada dhakhtarku qorey ama aanu qorin waxay u baahan tahay codsi qoraal ee waalidka/mas'uulka iyo la isticmaalayao foomka degamada bixisay oo ay ku jiraan:

- Magaca ilmaha
- Magaca iyo cinwaanka waalidka/mas'uulka
- Magca daawada, qiyaasta, wakhtiga siinta, iyo dariiqo loo siiyo
- Taariikhda la joojiyay
- Sababta daawada loogu baahan yahay

Waalidka/mas'uulka ardaygu waa inuu buuxiyaa foomka "Codsiga: Ee Qaadashada La Caawiyo ee Rijeetooyinka La Qorey ama aan La Qorin" Marka la oggolaado, daawadu waa inay dugsiga geeyaan waalidiinta ama dadka mas'uulka ah. Kala xiriir dugsiga ilmahaaga siyaasadda ku saabsan siinta daawada carruurta. Waalidiinta waxaa laga codsanayaa inay la xiriiraan maamulaha dugsiga haddii uu ilmuhu qabo baahiyo gargaarid gaar ah oo ay tahay in la bixiyo inta lagu jiro saacadaha dugsiga. Tusaalooyinka middan waxaa ka mid ah kateeter ka saarista, la socodka sokorta dhiigga iyo ka taxaddarrada suuxdinta. Kalkaalisadu waxay fududeyn doontaa oo isku dubaridi doontaa qaban-qaabada buuxinta baahiyahan, iyadoo ay weheliso talada wada shaqeynta waalidka iyo dhakhtarka.

## 4 HABKA OGEYSIINTA XIRITAANKA AMA BAAJINTA DUGSIGA

Haddii dugsiyada loo xiro ama loo baajiyo xaalada deg deg ah, cimilo xun, ama xaalad kasta oo kale oo saameyn karta badbaadada carruurta iyo shaqaalaha, ogeysiis rasmi ah ayaa lagu soo dhejin doonaa website-ka degmada [www.mnps.org](http://www.mnps.org), oo ay weheliso ogeysiiska telefishinada iyo idaacadaha maxaliga ah. Iyadoo ku xiran xaalada, degmadu waxay sidoo kale soo saari kartaa wicitaan toos ah ee qoysaska. Haddii aadan geli karin website-keena, waxaad wici kartaa Xarunta Macluumaadka Qoyska ee 615-259-INFO(4636) si aad u hesho macluumaadka ugu dambeeya ee ku saabsan furitaan ama xiritaanka dugsiga

## 5 BUUG GACMEEDKA ARDAYGA-WAALIDKA

Buug gacmeedka Waalidka iyo Ardayga ayay si dhijital ah dhammaan qoyska uga heli karaan bogga internetka ee degamada. Buug gacmeedkan, waxaad ka heli doontaa macluumaad waxter leh oo ku saabsan barnaamijyada quraacda iyo qadada, adeegyada la tatlinta dugsiga, shaqada guri, shirarka waalidka/maclimiinta, hababka loo la socdo xaaladaha degdegga ah ee dugsiga, xiritaanka iyo baajinta, anshaxa ardayga, iyo ka warbixinta horumarka ardayga.

Buug gacmeedka Arday-Waalidka waxaa lagu heli karaa booqashada [www.mnps.org/handbook](http://www.mnps.org/handbook).

## 6 MANHAJKA KU SALAYSAN HEERARKA

Heerarka waxbarasho ee Gobolka Tennessee waxaa lagu fuliyaa laga bilaabo barbaarinta. Si aad wax badan uga barato heerarka iyo manhajka lagu barto barbaarinta, fadlan booqo qeybta barashada (Manhajka iyo Tilmaamaha hoostood) ee [www.mnps.org](http://www.mnps.org).

# Taageerada Dugsiga

## 1 ADEEGYADA DARYEELKA KA HOR IYO KA DIB

Waxaa jira fursado badan oo loogu talagay barnaamijyada daryeelka ka hor iyo ka dib si loo kordhiyo waayo aragnimada waxarasho ee ilmahaaga wixii ka dambeeya saacadaha dugsiga. Barnaamijyada iyo bixiyeyaasha way ku kala duwan yihiin dugsiga. Liis dhammaystiran oo ka hor iyo ka dib bixiyeyaasha daryeelka goobta ayaa laga heli karaa [www.mnps.org](http://www.mnps.org) Qeybta Waxbarashada Dheeraadka ah (Ardayda & Qoysaska hoostood).

## 2 KA QEYBGELINTA QOYSKA

Waxaan ku qeexnay ka qeybgalka qoyska inay tahay iskaashi ka dhexeeya qoysaska iyo barayaasha taageera waxbarashada ardayga. Wadashaqeynta waxaa ka mid ah dhisidda iyo joogteynta xiriirka kalsoonida, iskaashiga waxbarashada, iyo xiriirka socda ee u dhaxeeya barayaasha iyo qoysaska. Waxaan ku dhiirigelinaa qoysaska inay si joogto ah ula xiriiraan maclimiinta iyo shaqaalaha wixii ku saabsan waxbarida, faragelinta, guusha, dhaqanka, iyo baahiyaha caruurtooda. Intaa waxaa dheer, dugsiyadu waxay idinla wadaagi doonaan filashooyinka barbaarinta waxayna ku siin doonaan warbixinno isdaba joog ah oo ku saabsan horumarka waxbarashada iyo dhaqanka ilmahaaga oo ay ku jiraan guulaha, caqabadaha, iyo koritaanka yoolalka. Qoysasku waxay sidoo kale haystaan fursad ay kaga qeybgalaan dugsiga iyo fursadaha waxbarashada degmada si ay u taageeraan waxbarashada carruurtooda. Macluumaadka ku saabsan ururka taageerada waalidka kala xiriir dugsiga ilmahaaga.

## 3 ADEEGYADA WAXBARASHADA GAARKA AH

Sida waafqasan Sharciga Gobolka Tennessee iyo Helitaanka Ilmaha, dugsiyadeenu waxay ku dadaalaan inay siiyaan ilmo kasta nooca jawiga waxbarasho ee ay u baahan yihiin.

Ujeedada Helitaanka Ilmaha waa in al aqoonsado, la helo, oo la qiimeeyo kuwa u baahan waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira. Kooxda Taageerada (S-Team) waa koox ka kooban shaqaale dugsiga oo bixiya taageerada dhaqan, bulsho, shucuur, tacliin, iyo taageero imaanshaha ilmahaaga. Kooxdu waxay go'aamin doontaa agabka looga baahan yahay ilmaha si uu ugu guuleysto jawiga waxbarashada. Ilmaha loo sugbiyay faragelinta S-Team qasab ma'aaha in loo gudbiyo waxbarashada gaarka ah. Si kastaba ha ahaatee, kooxdani waxaa laga yaabaa inay u shaqeeyso sidii tallaabo dhexdhexaad ah oo u dhaxeysa aqoonsiga dhibaatada iyo u gudbinta rasmiga ee ubadka si loo qiimeeyo qiimeyn dhammaystiran.

MNPS waxay u heellan tahay inay hubiso in arday kasta uu helo gargaarka ay u baahan yihiin. Sababtan awgeed, waxaan u araganaa in arday kasta oo loo aqoonsaday inuu u bahan yahay adeegyada waxbarashada gaarka ah oo uu haysto Barnaamij Waxbarasho Shaqsiyeed (IEP) kaas oo wax ka qabta baahiyahooda kuna habboon awooddooda. IEP-ga ardaygu wuxuu u adeegaa sida bar tixraac u ah dhammaan xubnaha kooxaha iyaga la falgala. Waxaan hubinaynaa ia arday kasta leeyahay IEP iyadoo lagu salaynayo heerarka waxqabad ee waxbarasho ee hadda jira, sida ugu habboon ee waxbarashada. Adeega waxaa lagu bixin karaa dugsiga aagga ama doorashada ardayga. Macluumaadka adeegyada waxbarashada gaarka ah waxaa laga heli karaa [www.mnps.org](http://www.mnps.org) qeybta Waxbarashada Gaarka ah ee (Baro hoosteeda).

## 4 WAXBARASHADA HIBADA IYO KARTIDA LEH (GATE)

Barnaamijka GATE ee MNPS waxa uu bixiyaa fursadaha waxbarid ee ardayda hibada/kartida iyo garaadka leh ee waxbarta. Manhajka lagu dhigto fasallada GATE waxaa loo qaabeeyay inuu ahaado mid adag, gacmo ku qabasho, isdhexgal iyo ku salaysnaanta mushkilad iyadoo diiradda lagu saarayo horumarinta awoodaha feker ee muhiimka ah iyo hal abuurka ardayda. Waxbarashadu waa isku dhaf waxayna la socotaa heerarka nuxurka Tennessee. Faslada GATE waxaa lagu bixiyaa fasalada K-8 ee dugsiga kasta ee hoose iyo dhexe ee MNPS. Ardaydu waa in loo aqoonsada inay yihiin kuwo hibo tacliimeed/karti ama hibo garaad leh si ay uga qeybqaataan xisadaha GATE. Macluumaadka dheeraad ah waxaa laga heli karaa adigoo booqanaya bogga Waxbarashada Hibada iyo Kartida leh ee [www.mnps.org](http://www.mnps.org) (Baro hoosteeda).

## 5 DAREESYADA IYO AGABYADA DUGSIGA

Fadlan booqo [schools.mnps.org](http://schools.mnps.org) si aad u hesho dugsiga ilmahaaga si uu helo macluumaadka gaarka ah ee khuseeya macluumaadka ku saabsan direyska dugsiga iyo agabka. Haddii aad qabto su'aalo dheeraad ah, qoysasku waxay sidoo kale la xiriiri karaan Xarunta Macluumaadka Qoyska 615-259-INFO(4636) ama [familyinfo@mnps.org](mailto:familyinfo@mnps.org).

## 6 PORTAL-KA KAMBAS-KA

Portalka Kambaska ee MNPS wuxuu qoysaska marin u siiyaa fasalka oo ay faraha ku hayaan. Wuxuu si toos ah ugu xiran yahay nidaamka maamulka ardayda degmada, Infinite Campus, Portal Kambaska wuxuu bixiyaa macluumaadka waqtiga dhabta ah ee ku saabsan buundooyinka, shaqooyinka, imaanshaha, anshaxa iyo wax badan.

Portal Kambas-ka waxa uu ogalaadaa xiriir wanaagsan oo dhex mera macallimiinta iyo qoysaska iyada oo loo marayo emaylada iyo digniinaha mobilada. Macallimiintu waxay fariimo u diri karaan ama kooxaha waalidiinta. Dugsiyadu waxay soo dhejin doonaan warar iyo ogeysiisyo muhiim ah oo ay dhammaan qoysaskooda arkaan. Ka gal Kambaska Partalka [www.mnps.org/campusportal](http://www.mnps.org/campusportal).

## 7 BARNAAMIJKA INGIRIIS BARTAYAASHA

Sida ku cad Xeerka Guddiga Waxbarashada ee Gobolka Tennessee (0520-01-19-.03), Dhammaan ardayda Sahanka Luuqadda Guriga (HLS) ay tilmaamayaan luuqad aan Ingiriis ahayn waa in lagu baaro Waaxda Waxbarashada oo oggolaatay baarista aqoonta Ingiriisiga si loo go'aamiyo haddii uu ardaygu u qalmo Adeegyada ESL-ka. Haddii uu ardaygu buuxin waayo shuruudaha gudbidka, ardaygu waa in loo aqoonsadaa inuu yahay arday EL ah oo wuxuu helayaa Adeegyada Tooska ah ee ESL, ilaa waalidka ama mas'uulka ay doortaan inay ka tanaasulaan Adeegyada ESL Tooska ah. Dugsiyadu waa in ay ku gudbiyaan macluumaadka luuqad ay fahmi karaan waalidiinta Ingiriisigoodu xaddidan yahay barnaamij kasta, adeeg kasta, ama waxqabad kasta oo loogu yeero dareenka waalidiinta aqoonta u leh Ingiriisiga (US DE Office of Civil Rights). Haddii aad kaalmo uga baahan tahay kulanka oo uusan joogin turjumaan, fadlan weydii dugsiga inuu la xiriiro Waaxda Turjumaada Degmada si ay kuugu diyaariyaan adeegyada. Macluumaadka ku saabsan barnaamijka EL waxaa lagu heli karaa booqashada bogga Ingiriis bartayaasha [www.mnps.org](http://www.mnps.org) (Baro hoosteeda).

# U Raacitaanta Baska ee Dugsiga

Gaadiidka baska waxaa la siiyaa ama looga soo qaadaa dugsiga carruurta ku jirta Dugsiyada Dadweynaha ee Metro Nashville ee ku nool meel aagooda dugsiga u jirta 1.25 mayl. Shaqaalaha dugsiga ayaa kaa caawin doona go'aaminta haddii uu ilmahaagu u qalmo inuu baska u raaco dugsiga. Macluumaadka marinka baska waxaa laga heli karaa [www.mnps.org/transportation](http://www.mnps.org/transportation) ama qoysaska waxay wici karaan Xarunta Macluumaadka Qoyska si loo caawiyo 615-259-INFO(4636).

Waxda Gaadiidka MNPS waxay waalidiinta u soo diri doontaa macluumaadka marinka baska toddobaad ka hor maalinta koowaad ee dugsiga haddii uu ilmahaagu ka diiwaangashan yahay Dugsiyada Dadweynaha ee Metro Nashville. Waalidka ama qofka loo igmaday waa in uu ku weheliyaa ilma kasta meesha uu baska istaago. Waxaa lagu talinayaa in ilmahaagu yimaado boosteejada baska ugu yaraan 10 daqiiqo ka hor in si caadi ah looga qaado.

## TALOONYINKA AMNI EE BASKA DUGSIGA

Waalid ahaan, waxaad gacan ka geysan kartaa hubinta in ilmahaagu si badbaado leh u yimaado uuna uga soo baxo dugsiga maalin kasta adiga oo ku dhaqma talooyinka badbaadada dugsiga ee soo socda:

- Hubi in ilmahaagu yimaado boostajeeda baska 10 daqiiqo ka hor wakhtiga loo qorsheeyay inuu baska yimaado.
- Markuu basku soo dhowaado, xusuusi in ilmahaagu uu istaago meel ugu yaraan ka for shan talaabo oo waa weyn geesta uu safka baska ka soo galo.
- Xusuusi ilmahaaga in uusan ka daba ordin baska dugsiga haddii uu hortii ka dhaqaaqey boosteejada.
- Xusuusi ilmahaaga inaanu weligii hor ordin ama daba ordin baska dugsiga si uu u soo qaato shay ka dhacay ama uu soo iloobey.
- Hubi inaad ilmahaaga u sheegto inuusan weligii fuulin baska ilaa uu si buuxda u istaago.
- Xusuusi ilmahaaga inuu si adag u qabsado biraha gacanta si uu baska u fuulo ka dib marka basku istaago oo albaabku furmo.
- Ardaydu waa in aanay weligood riixin arday kale marka ay baska fuulayaan ama ka soo degayaan.
- Dhammaan ardayda baska raacaya waa inay toos u aadaan kursigooda oo ay si deggan u fadhiistaan. Tani waxay u ogolaaneysaa darawalka baska inuu xooga saaro inuu baska si badbaado leh u kaxeeyo.
- Ardaydu waa inay waligood meel jirkooda ka mid ah ka bixin daaqaada baska.
- Markaa baska aan la saarneyn, hubi in ilmahaagu ka warhayo aagagga khatarta ah oo uu had iyo jeer u muuqdo darawalka baska. Aagga Khatarta ahi waa aag ballac ahaan 1 mitir ah oo dhan kasta oo baska dugsiga ah waa meesha ay carruurta ugu khatar badan tahay in lagu dhaco. Carruurta waa in la baro inay 1 mitir ka fogaadaan baska dugsiga (ama inta ay awoodaan inay ka fogaadaan) oo aaney weligood ka soko marin. Waa in loo sheegaa inay shan talaabo oo waaweyn ka hormaraan baska ka hor intaaney gudbin si darawalku uu si cad ugu arko.

# Wax la akhri Ilmahaaga



Kor u akhrinta waa mid ka mid ah waayo araginimada ugu muhiimsan ee aad siin karto ilmahaaga. Inaad kor wax ugu akhriso ilmahaaga waxay kordhisaa erayada, waxay dhistaa fahamka sheekada waxayna dhiirigelisaa jacaylka akhriska. Carruurta da'dooda tahay afar iyo shanta sano jirka ah waxay jecel yihiin inay dhegaystaan dhammaan noocyada buugaagta. Sheekooyinka loo akhriyaa waa inay noqdaan kuwa gaaban oo sawiro soo jiidasho leh ama loo kala qeybiyaa qeybo ku salaysan feejignaantooda.

Dhib malaha inaad buug u akhriso ilmahaaga, halkan waxa ah dhawr waxyaalood oo ay tahay in la xusuusto:




- Dooro buugaag adiga iyo ilmahaaga aad ku raaxeysan kartaan! Haddii aad bilowdo buug oo aad go'aansato in aanu kugu habooneyn, waa caadi in aad dhigto oo aad mid kale tijaabiso.
- Akhrintaada wax ku muuji. Samee dhawaaq saameyn leh, u samee jilayaasha codad kala duwan-wax kasta oo adiga iyo ilmahaagaba kugu xiiso galinaya!
- Ka dhig mid isdhexgal leh! Ma jiraan erayo ama weedho soo noqnoqda? Ilmahaagu ha ku soo biiro.
- Aqoonso ereyada buugga ee ku cusub ilmahaaga oo kala hadal.
- Akhri sawirada. Ma ogtahay inaad akhrin karto buug adiga oo aan waligaa akhriyin erayada? Fiiri sawirada oo ilmahaaga ha kuu sheego sheekada ay arkayaan. Waxaad iyaga ka caawin kartaa adiga oo weydiiya su'aalo ay ka mid yihiin, "Maxaa halkan ka dhacaya?" "Maxaad aragtaa?" ama "Maxaa ku xiga oo aad u malaynaysaa inuu dhici doono?"
- Ka hadal buugga. Sheekadu ma'aha inay ku dhammaato bogga ugu dambeeya! Ka hadal waxaad akhriso. Maxaad ka heshay? Maxaanad jeclaysan? Noloshada ma la xiriirn kartaa waxaad akhriso?

## QORAAYAAL & CINWAANO LA SOO JEEDIYAY



- *A Chair for My Mother* by Vera B. Williams
- *Ben's Trumpet* by Rachel Isadora
- *Blueberries for Sal* by Robert McCloskey
- *Bread and Jam for Frances* by Russell Hoban  
Illustrated by Lillian Hoban
- *Chicka Chicka Boom Boom* by Bill Martin, Jr.  
and John Archambault, Illustrated by Lois Ehlert
- *Dear Zoo* by Rod Campbell
- *Doctor De Soto* by William Steig
- *Farmer Duck* by Martin Waddell,  
Illustrated by Helen Oxenbery
- *Freight Train* by Donald Crews
- *Goodnight Moon* by Margaret W. Brown,  
Illustrated by Clement Hurd







- ***Happy Birthday, Moon*** by Frank Asch
- ***Harold and the Purple Crayon*** by Crockett Johnson
- ***Horton Hatches The Egg*** by Dr. Seuss
- ***If You Give a Mouse A Cookie*** by Laura J. Numeroff, Illustrated by Felicia Bond
- ***Julius*** by Angela Johnson, Illustrated by Dav Pilkey
- ***Komodo!*** by Peter Sis
- ***Little Blue and Little Yellow*** by Leo Lionni
- ***Lyle, Lyle, Crocodile*** by Bernard Waber
- ***Madeline*** by Ludwig Bemelmans
- ***Make Way for Ducklings*** by Robert McCloskey
- ***Miss Nelson Is Missing*** by Harry Allard and James Marshall
- ***Mouse Paint*** by Ellen S. Walsh
- ***Mr. Gumpy's Outing*** by John Burningham
- ***Officer Buckle and Gloria*** by Peggy Rathmann
- ***Old Black Fly*** by Jim Aylesworth, Illustrated by Stephen Gammell



## Xusuusnow!

Akhrinta kale ee la soo jeediyay, la xiriir dugsiga ilmahaaga ama laanta xaafadaada ee Maktabada Dadweynaha ee Nashville. Waxaad qoyskaaga u codsan kartaa kaarka maktabadda oo lacag la'aan ah. Maktabadu waxay kaloo bixisaa waxqabadyada qoyska oo ay ku jiraan bandhigyada puppetka, waqtiyada wax akhriska, iyo dhacdooyinka kale ee xiisaha leh.

# Tirinta Ilaa Xanaanada

## 1 XAGAAGA KA HOR INTA UUSAN DUGSIGA BILAABIN:

- Go'aanso haddii aad u baahan doonto adeegyada daryeelka ka hor iyo ka dib. Dugsigaaga wuxuu kaa caawin karaa inaad ogaato adeegyada gudaha ama agagaarka dugsigaaga.
- La akhri ilmahaaga maalin kasta oo kala hadal inay sheekadu run tahay iyo in la rumaysan karo. Weydii ilmahaaga inuu saadaaliyo waxa dhici doona.
- Kala hadal ilmahaaga. Hubi in ilmahaagu kuu sheegi karo waxa uu rabo halkii uu farta ku fiiqi lahaa ama ooyi lahaa.
- Ku dhiiri geli ilmahaaga inuu sharaxo, ka jawaabo oo uu ku hadlo weedho dhamaystiran.
- Ka caawi ilmahaaga inuu aqoonsado midabada aasaasig ah: casaan, jaalle, buluug, cagaar.
- Sii cunugaaga fursado uu ku isticmaalo maqasyada amaanka ah, midabada, iyo ulaha xabagta.
- Kala hadal ilmahaaga walxaha. Ka wada hadla cabbirka iyo qaabka walxaha. Ku caawi in uu ogaado in ilmahu yar yahay, guri wen yahay, geed dheer yahay, geed kalena gaaban yahay. Ka hadal kubbadda wareegsan, miiska labajibbaaran, iyo geesaha sandwichka.
- Qoraalo fudud u qor ilmahaaga.
- Xooga saar mas'uuliyadda saaran ilmahaaga. Bar inay u labistaan cayaarta, dugsiga, ama wakhtiga jiiifka; in la iska dhigo dharka iyo kala soocida alaabta ay ku ciyaaraan.
- Bar ilmahaaga inuu ixtiraamo alaabta ay ku ciyaaraan iyo alaabta caruurta kale.
- Kala hadal ilmahaaga sifooyinka uu ku raadin karto asxaabta iyo sifooyinka aad kaga digtoonaato shisheeyaha.
- Kala hadal ilmahaaga dhammaan waxyaabaha wanaagsan oo ay kala kulmi doonaan sanadka soo socda.
- Ku celceli tirinta hal ilaa 20: buskud, sunuuda, quruuruxa, midabyo. Weydii ilmahaaga inuu kuu keeno laba qaaddo, hal tufaax, iyo afar buug. Ka caawi ilmahaaga inuu garto tirooyinka kow ilaa 10.
- Ka caawi ilmahaaga inuu bilaabo aqoonsashada xuruufaha, xarfaha waaweyn iyo kuwa yaryaba.
- La xiriir laanta Maktabadda Dadweynaha ee Nashville si aad u hesho macluumaad ku saabsan sida loo amaahdo buugaagta aad ilmahaaga la akhriso oo aad uga qeybgasho barnaamijadooda xagaaga.

**Booqo website-keena u diyaarsanaanta kindergarten si aad u hesho macluumaad iyo waxqabad dheeraad ah:**

**[www.mnps.org/countdowntokindergarten](http://www.mnps.org/countdowntokindergarten)**

## 2 INTA LAGU JIRO TODDOBAADYADA KA HOREEYA INTAANU DUGSIGA BILAABAN:

- Sii wad inaad kala hadasho ilmahaaga dhammaan waxyaabaha wanaagsan ee uu kala kulmi doono dugsiga.
- Haddii uu ilmahaaga u lugeeyo dugsiga, ku caawi ilmahaaga inuu barto habka uu dugsiga u aadayo. Hubi inaad ku dhaqanto dhammaan xeerarka badbaadada inta aad jidka hayso.
- Kala hadal ilmahaaga qorshaha daryeelka ka hor iyo ka dib.
- Sii ilmahaaga fursad uu ku arko dugsigiisa cusub si uu u barto dhismaha.
- Samee wakhtiga hurdada si aad u hubiso in ilmahaagu helo qadarka nasashada saxda ah oo ay u baahan yihiin si ay u helaan tamarta ay u baahan yihiin maalinta buuxda ee xanaanada
- La soco oo xaddid daawashada telefshanka ilmahaaga iyo isticmaalka qalabka elegtarooniga ah. Ka caawi ilmahaaga doorashada barnaamijyada ama abka soo bandhigaya fikrado, hab-dhaqan iyo dabeecad ku habboon.

## 3 MAALINTA KA HOREYSA DUGSIGA:

- Ka caawi ilmahaaga inuu doorto dharkiisa maalinta ugu horeysa ee dugsiga.
- Kala tasho ilmahaaga habka uu u aadayo guriga ama daryeelka ka dib.
- Kala hadal ilmahaaga cidda lala xiriiraayo xaaladda degdega ah. Hubi inay garanayaan
- wax ka badan hal qof oo loo waci karo xaaladda degdeg ah.

## 4 MAALINTA KOOWAAD EE DUGSIGA:

- Ilmahaaga ku caawi in uu si fudud oo degdeg ah ula qabsado oo AANAD la joogin dhawrka maalmood ee ugu horreeya.
- Ka wada hadla muhiimada ay leedahay in had iyo jeer la wadaago ogeysiisyada iyo fariimaha macallinka.
- Dhammaadka maalinta, weydii ilmahaaga inuu magacaabo labo shey oo uu ku sameeyay dugsiga.
- Si xamaasad leh uga hadal dugsiga si aad u siisid dhiirigelin dheeraad ah si ilmahaagu u dareemo kalsooni ku saabsan maalinta xigta ee dugsiga.

**WAXAAN RAJEYNAYNAA INAAN  
IDIN ARAGNO ADIGA IYO  
ILMAHAAGA MAALINTA UGU  
HOREYSA EE KINDERGARTENKA!**

---



[www.mnps.org](http://www.mnps.org) • 615-259-INFO(4636)

DUGSIYADA DADWEYNAHA EE METRO NASHVILLE (MNPS) KUMA TOKOORAAN ISIR, DIIN, CAQIIDO, JINSI, AQOONSIGA JINSIGA, JIHADA GALMADA, ASALKA QARAN, MIDABKA, DA'DA, IYO/AMA NAAFANIMO GELITAANKA, HELITAANKA AMA HAWLGALKA BARNAAMIJYADA, ADEEGYADA, AMA HAWLAHEEDA MNPS KUMA TAKOORTO SHAQAALEYSIGEEDA AMA HAB DHAQANKEEDA SHAQOSIIN.